
HERITAGE INSTITUTE




Warbixin Siyaasadeed

# Kal-guddoonka Soomaaliya ee Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay 2025–2026

Abriil

# Shaxanka Tusmooyinkan


**01.** **Hordhac**
**Kursi Miiska Saaran, Xilli lagu Jiro Dibudhis** 4

**02.** **Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay**
**Qaabdhismeedka, Awoodda iyo Caqabadaha jira** 6

**03.** **Habraaca Daraasadda** 7

3.1 Xogta iyo Ilaha Tixraaca 7
3.2 Qorshe-hawleedka Falanqaynta 8
3.3 Abbaarta iyo Caqabadaha 8

**04.** **Markii Koobaad ee ay Soomaaliya Shirguddoomiso Golaha Ammaanka (1971–1972):**
**Halbeeg Muujinaya Awoodda Luntay** 8

4.1 Kaqaybgallada iyo Waxqabadyada 9
4.2 Baaxadda Saamaynta Haayadda 10
4.3 Xaaladda Shirguddoon Golaha Ammaanka ee Hadda 10

**05.** **Kal-guddoonkii labaad ee Soomaaliya (2025–2026):**
**Soo Laabasho Ka Dhalatay Soo-kabasho, Balse aan Ku Iman Awood Buuxda** 11

5.1 Kashaqaynsiinta Qaranimada Iyada oo la Dhisayo Dowladnimada 11
5.2 Maamul ku Tiirsan Shakhsiyaad, oo aan Ku Dhisnayn Nidaam 12
5.3 Marxaladda Kalaguurka ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda 12
5.4 Isqardhaafka Hawlgalka Dibedda 13
5.5 Hawlgalka Joogtada ah ee New York 14
5.6 Dood ku Dhisan Ujeeddooyinka Dowlad-dhiska 15
5.7 Guusha la Gaadhay, Awood Hawlgal oo Horumar ku Dhisan 18

**06.** **Caqabadaha iyo Fursadaha ku Gadaaman**
**Dolwad Sookabanaysa** 18

6.1. Dhaqdhaqaaqyada Gudaha: Iswaafajinta Dibudhiska Gudaha iyo Matalaadda Dibadda 18
6.2. Diblomaasiyadda Gobolka: Madaxbannaanida oo ah Mudnaanta ugu Weyn ee Golaha 19
6.3. Goobta Caalamiga ah: Maareynta Is-dheelitir La'aanta iyo Kala-qaybsanaanta 21

**07.** **Talooyin:**
**U Beddelidda Falanqaynta Ficil Dowladeed** 22

7.1. Xirfadaynta Adeegga Dibedda: Dhisidda Joogitaan Xirfadaysan 23
7.2. Xoojinta Isku-xidhka: Abuuridda Xudun Mideysan oo ku Saleysan Khibrad 24
7.3. Yoolka Fog: Dhisidda Horumar Joogteysan iyo Diblomaasiyad Haayadeed 25

# Nuxurka Daraasadda

Qiimayntani waxa ay lafaguraysaa kal-guddoonka aan joogtada ahayn ee ay Soomaaliya ku noqotay guddoomiyaha Golaha Amniga Qaramada Midoobay ee 2025-2026. Kursigani waa astaan sharafeed iyo halbeeg siyaasadeed oo istaraatiiji ah: waa fagaare ay Soomaaliya si rasmi ah ugu difaacan karto madaxbannaanideeda qaran, maadaama oo ay wajahayso cadaadisyo diblimaasiyadeed oo ugub ah—gaar ahaan aqoonsiga Israa'iil ee maamulka goonni-goosadka ah iyo dadaallada Itoobiya ku raadinayso in ay hesho marin-badeed. Sidaas darteed Soomaaliya waxa ay wajahaysaa hubanti la'aan madaxbanaaniyeed: waa in ay awooddeeda dowladnimo ka muujisaa masraxa diblomaasiyadeed ee muhiimadda weyn u leh Qaramada Midoobay, iyada oo ay haayadaheeda lafdhabarta u ah dowladdu weli dibudhis ku jiraan.

Soomaaliya waxa ay ku guulaysatay in ay joogitaan muuqda oo lagu kalsoonaan karo ku yeelato Golaha Amniga Qaramada Midoobay, taas oo xaqiijinaysa soo laabashadeeda siyaasadeed. Si kastaba ha ahaatee, waxa guushan wiiqay itaal-darrada qaabdhismeedka haayadaha dowladda. Wasaaradda Arrimaha Dibaddu waxa ay ku shaqaysaa habab kumeelgaadh ah iyo magacaabisyo siyaasadaysan, taas oo caqab ku keentay iskudubbaridka xidhiidhka u dhexeeya iyada iyo Xafiiska Joogtada ah ee New York. Inkasta oo ay dadaalaan shaqaalaha kooban ee xafiiskan yar joogaa haddana ma laha awooddii xirfadeed ee looga baahnaa goobtan oo kale (tusaale ahaan, takhasusaadkii sharciga caalamiga ah, nidaamyada iyo habraacyada cunaqabataynta, sharciga badda, iyo falanqaynta dhaqaalaha/sharciga) sidaas darteed shaqadoodu inta badan waxa ay u dhacdaa qaab falcelineed oo aan istaraatiijig ahayn oo laab la kac iyo qorshe la'aan ku dhisan.  Natiijada: Ilaalinta madaxbannaanida ayaa ah mawduuca qeexaya qodobkan, laakiin weli Soomaaliya joogitaankeeda New York umaysan beddelin mid diblimaasiyadeed oo istiraatiiji ah.

Sidaas darteed, qiimeyntu waxay u baahan tahay in laga fiiriyo laba xagal oo muhiim ah: in la mahadiyo muhiimadda iyo faa'iidada laga dhaxlay saamaynta muuqata ee ka soo hoyatay dibucurashada kal-guddoominta Golaha Ammaanka ee Soomaaliya, iyo in la sameeyo falanqayn qotodheer oo muujinaysa goldaloolooyinka haayadaha caqabadda ku ah in falcelinta loo beddelo fal saamayn leh. Sannadka ugu dambeeya waa in mudnaan gaar ah la siiyo xalalka degdeg ah , si loo hirgeliyo dhaqdhaqaaqyo saameyn sare leh, waana in la dhiso Koox Khubaro ah oo Madaxabannaan, oo soo saarta tilmaameyaal istaraatiiji ah oo toddobaadle ah, sida oo kale waa in la hawlgeliyo la-taliyayaal farsamo oo kumeelgaadh ah oo la shaqeeya Hawlgalka, waana in la adkeeyo habraacyada  magacaabista xilalka muhiimka ah ee ku saleysan jagooyinka mudnaanta leh, iyada oo la raacayo Sharuucda lafhdbarta u ah Adeegyada Dibedda. Sida oo kale waa in la qaato nidaamiyayaal sharci oo mideeya bayaannada, waraaqaha rasmiga ah, iyo warbixinada haayadaha, si loo siyaasadda Qaramada Midoobay ee Soomaaliya u noqoto mid sugan oo aan gole-kafuul ahayn. Haddaba, haddii aan tallaabooyinkan loo hargalini si degdeg ah oo isku-duuban, waxa uu kursiga Goluhu ka gudbi karaa  astaan  soo kabasho oo magac u yaal ah, waxaanu noqon karaan aalad firfircoon oo lagu difaaco madaxbannaanida Soomaaliya.

# 1. Hordhac

## Kursi Miiska Saaran, Xilli lagu Jiro Dibudhis

2-dii bishii Jannaayo 2026 ayaa uu Abukar Daahir Cismaan oo ah Wakiilka Joogtada ah ee Soomaaliya u fadhiya Qaramada Midoobay qabtay guddoominta Golaha Ammaanka. Tani waxa ay qayb ka ahayd xubinnimada aan joogtada ahayn ee Soomaaliya oo kalkeedu noqday bishii kobaad ee 2025–2026.[1] Laba sababoodba guushani waa mid taariikhi ah. Waa markii labaad ee ay Soomaaliya jagadan ku fadhiisato tan iyo bishii jannaanyo 1972 oo ahayd kalkii ugu horreeyay ee ay Soomaaliya guddoomiso Golahan (1971–1972.) Ta labaad, libintani waxa ay astaan u tahay in Soomaaliya ku soo laabatay miisaska diblomaasiyadda caalamiga ah, kadib 30 sano oo ay la daalaadhacaysay dagaallo sokeeye oo ka go'adoomiyey madalaha ay yaallaan doodaha caalamiga ahi.

Dibucurashada guusha kursigani waxa ay timi xilli cakiran oo ay Soomaaliya soo foodsaareen culaysyo diblumaasiyadeed oo ka dhan ah madaxbannaanida dalka. Maalmo yar uun ka hor intii aanay Soomaaliya ku fadhiisan kursiga shirguddoonka Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, waxa ay Soomaaliya cambaaraysay aqoonsiga Israa'iil ku ictiraaftay maamulka goonni-goosadka ah ee gobollada waqooyi. Tallaabadaas waxa markiiba qaaddacay Midowga Afrika, Jaamacadda Carabta, Ururka Iskaashiga Dalalka Islaamka (OIC), iyo Shiinaha.[2] Sida oo kale Maraykanka iyo Midowga Yurub ayaa si cad u muujiyay taageeradooda ku saabsan ilaalinta dhowrsanaanta xuduudaha iyo madaxbannaanida Soomaaliya.

Si kastaba ha ahaatee dhacdadan taariikhiga ahi waxa ay la kowsatay guul iyo caqabado ugub ah oo isbarkan, kuwaas oo dib u qaabeeyay gole-joogga iyo gorgortanka diblumaasiyadda caalamiga ah ee Soomaaliya. Soomaaliya hal mar ayay hore u guddoomisay Golaha Aammaanka, horraantii 1970-neeyadii, laakiin waa laba xaaladood oo kala wacyi iyo waaqici duwan. Xilligaas, dalku waxa uu ahaa mid curdin ah oo ka soo doogay gumaysigii reer Yurub, laakiin waxa uu lahaa hiddisayaal iyo himilooyin dowladnimo oo horusocod ah. Dowladda Soomaaliya waxa ay xilligaas midaysay himilooyinka qalinka iyo hab-dhigaalka Soomaaliga, iyada oo samaysay Ololahii Qaranka ee Akhris-Qoraalka, islamarkaana dhistay jaamacado iyo cisbitaallo. Sida oo kale waxa ay jaamacado iyo tababarro dibadeed u dirtay dufcadihii ugu horreeyay oo noqday foolaadkii aqoonyahanka Soomaaliyeed. Waagaas waxa si cuddoon loo xoojiyay awoodda dowladeed ee Soomaaliya, waxaana marba marka ka danbaysa sii kobcayay awoodaha haayadaha dowladda, sida oo kale kaqaybgalka fagaarayaasha diblumaasiyadda iyo siyaasadda arrimaha dibaddu waxa ay ku dhisnaayeen hirgalinta mashaariic istaraatiiji ah oo xanbaarsan himilooyinka qaran.

1. "UN Web TV, Press Conference by the President of the Security Council (Somalia)," December 29, 2025, accessed January 17, 2026, https://webtv.un.org/en/asset/k1z/k1zs77b699.
2. "UN Security Council Members Condemn Israel's Recognition of Somaliland," Al Jazeera, December 30, 2025, accessed January 17, 2026, https://www.aljazeera.com/news/2025/12/30/un-security-council-members-condemn-israels-recognition-of-somaliland.

Maanta, Soomaaliya mar kale waxa ay ku hawlan tahay mashaariic dowlad-dhiseed oo xanbaarsan himilooyin qaran, kuwaas oo dib loogu dhisayo haayadaha dalka ee aasaasiga ah, kadib soddon sano oo uu dalku la daalaadhacayay dagaallo sokeeye oo ragaadiyay. Wasaaradaha waxa lagu sameeyay dibudhis, shaqaalaha rayidka ah iyo ciidamada amnigana dibbaa loo tababaray, waxaana la soo celiyay nidaamyadii maaliyadda. Ha yeeshee, shaqadani waa mid ku socota xawaaraha diinka oo gaabis ah, taas oo u baahan dardargalin cusub oo taxaddar dheeraad ah leh—tani waa mishiinka dhaqaajinaya nidaamka dowladnimada.

Marka loo eego xaaladda jirta, kursiga Golaha Aammaanku waxa uu maanta u shaqaynayaa si ka duwan sidii uu mar ahaan jiray. Ma aha fagaare cod dheer lagaga dhex gorgortamo, balse waa madal diblumaasiyadeed oo u adeegta xaqiijinta fursadaha siyaasadeed, isxulufaysiga istaraatiijiga ah, iyo xoojinta xasilloonida gudaha ee muhiimka u ah soo kabashada dalka. Shaqadani waxa ay u baahan tahay tallaabooyin degdeg ah oo diiradda lagu saarayo caqabadaha ka soo cusboonaaday dhowrsanaanta xaduduudaha iyo madaxbannaanida Soomaaliya.

Jawiga noocan ah oo kale ah, xubinimada Golaha Ammaanku waxa ay ciyaartaa door ka ballaadhan la soo noqoshada fagaare-joog siyaasadeed oo magac u yaal ah, waxaanay noqotay mid ka mid ah goobaha dhif iyo naadirka ah ee ay Soomaaliya si rasmi ah uga diifaacan karto madaxbannaanideeda, iyada oo u maraysa habraacyada dejisan ee caalamiga ah. Sidaas darteed, guddoomintii Golaha Ammaanka ee Jannaayo 2026, waxa uu Soomaaliya siiyay fagaare siyaasadeed oo miisaankiisu culus yahay, xilli uu difaaca midnimada dhuleed ee Soomaaliya u baahan yahay dadaal diblomaasiyadeed oo joogto ah, kaas oo raacaya habraacyo diblimaasiyadeed oo nidaamsan.

Lafagurkan soo socdaa waxa uu ka duulayaa in aanay guddoominta Golaha Ammaanka ee Soomaaliya ahayn astaan guuleed oo keli ah, balse ay tahay tijaabo soo kabasho oo muujinaysa awoodda madaxbannaanida Soomaaliya. Waxa ay u kuurgalaysaa sidii astaantan guuleed loogu beddeli lahaa haayad firfircoon, halkaas oo ay itaaldarrada haayadeed waydaysay waxqabadkeeda diblomaasiyadeed iyo sidii uu Golahani u noqon lahaa fagaare-joog siyaasadeed oo muhiim ah iyo weliba goob difaac oo lagu ilaaliyo habsamisocodka dowlad-dhiska Soomaaliya.

Ujeeddada daraasaddani ma aha in Soomaaliya lagu dhereriyo halbeegyada lagu qiyaaso waxtarka diblimaasiyadeed ee caalamiga ah, balse waa in la qiimeeyo waxa ay fursaddani uga dhigan tahay shar iyo khayrba — ilaalinta madaxbannaaniyeed ee dal aan weli u dhismin si dhammaystirmin.

# 2. Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay: Qaabdhismeedka, Awoodda iyo Caqabadaha jira.

Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay waxa la aasaasay 1945, waana hayaadda ugu muhiimsan ee lafdhabarta u ah fulinta nidaamyada caalamiga ah sida ilaalinta nabadda iyo amniga, waxaanay leedahay awood sharci-fulineed oo gaar ah sida ku xusan Cutubka VII ee Axdiga Qaramada Midoobay.

Dowlad sida Soomaaliya oo kale dibudhis ku socdo haayadaheeda aasaasiga ah, isla markaana wajahaysa cadaadisyo ugub oo dibadeed, waxa muhiim ah in la fahmo jaranjarooyinka awoodeed ee Golaha Ammaanka, si loo qiimeeyo waxa ay ka dhigan tahay xubinnimada soomaaliya iyo guulaha dhabta ah ee ay ka gaadhi karto.

Golahani waxa uu ka kooban yahay 15 xubnood oo ay ku jiraan shanta joogtada ah (P5) oo leh awooddda diidmada qayaxan— Shiinaha, Faransiiska, Ruushka, Ingiriiska iyo Maraykanka iyo weliba tobanka xubnood ee la soo doorto (E10) oo muddo-xileedkoodu yahay laba sano. Shanta dal ee leh awoodda diidmada qayaxan ayaa xuddun u ah fulinta hawlaha Golaha, taas oo mid kasta siisay awood uu ku burburin karo go'aannada lidka ku ah danahiisa. Haddaba habdhaqankan awoodeed ee kootada ah ayaa marar badan curyaamiyay hawlgallada golahan laga soo bilaabo Suuriya illaa Ukraine.

Marka loo eego Soomaaliya, qaabdhismeedkani waxa uu qeexayaa fursadaha iyo xaddidnaanta saamaynta labadaba:

1

### Qaraarrada aan rasmi ahayn

Kulannada albaabadu u xidhan yihiin waa halka ay ka dhacaan qaraarrada dhabta ah ee Golahu. Habdhaqankoodan qarsoodiga ah ayaa halis ku ah xafiisyada ergooyinka yaryar ee la midka ah tan Soomaaliya, ee aan haysan shaqaale ku filan oo ay kula socon karaan, ku falanqayn karaan, kuna faragelin karaan shirdoceedyada xasaasiga ah.

2

### Nidaamka Penholder

Xubnaha joogtada ah ayaa caadi ahaan gacanta ku haya qorista qaraarrada iyo ajandayaasha golaha. Tani waxa ay awoodda dejinta ajandayaasha badankooda ku soo ururisay xubnahan leh awoodda diidmada qayaxan, waxaanay dowladaha yaryar ku qasbaysaa in aanay wax saameyn ah ku yeelan waxkabeddelka iyo dhisidda xulufaysi midho dhal leh— xeelado iyo xirfado dibulimaasiyadeed oo ay Soomaaliya hadda uun dibu u bilowday in ay horumariso, kadib sannado badan oo ay la daalaadhacaysay itaaldarrooyin haayadeed.

| 3 | **Tobanka xubnood ee la soo doorto (E10) iyo Caucus-ka Afrika (A3)**<br>Xubnaha la doortay waxa ay raadinayaan fursad istiraatiiji ah oo lagu xoojinayo hufnaanta iyo saameynta Golaha Ammaanka, laakiin saamayntoodu waxa ay si weyn ugu xidhan tahay isku-xidhnaantooda gudaha. Soomaaliya, oo kaqaybgal joogto ah ku yeelatay A3 ayaa lafdhabar u ah kor u qaadista awooddeeda diblomaasiyadeed. Dhanka kale, iskudubbarid la'aanta kooxdani waxa ay wiiqaaysa awoodda ay Soomaaliya u leedahay qaabaynta go'aanada muhiimka ah ee saamaynta ku leh Geeska Afrika. |
|---|---|

Qaabdhismeedka Golaha Ammaanka oo ah mid aan ku salaysnayn matalaad rasmi ah ayaa muddo dheer la kulmayay dhaleecayn xooggan oo ku salaysan dhabnimada matalaadda iyo madaxbannaanida go'aannada Afrika, taas oo ka muuqata baaqa Midowga Afrika ee Ezulwini Consensus oo ku nuuxnuuxsaday in Afrika hesho matalaad dhab ah oo joogto ah. Si kastaba ha ahaatee, iska-caabbinta joogtada ah ee P5 ayaa weli caqabad ku ah hirgelinta dibuhabaynta looga baahan yahay in Afrika matalaad dhab ah ku yeelato Golaha Ammaanka.

Marka loo eego xaaladda Soomaaliya, isudheellitir la'aantani ma aha mid aragtiyeed oo keli ah— balse waxa ay si toos ah u qaabaysaa goobta ay Soomaaliya ka difaacanayso madaxbannaanideeda. La tacaalidda caqabadaha la xidhiidha aqoonsiga goonni-goosadka iyo faragelimaha dibadeed waxa ay u baahan yihiin in lagu hawlgalo nidaamyo sharci oo ay xeerarkiisu si weyn ugu hiilinayaan dalalka ay qusayso. Sidaas darteed, waa in la qiimeeyaa doorka kartiyeed ee ay Soomaaliya ku leedahay Golaha Ammaanka, iyada oo si weyn loo tixgelinayo isudheellitirnaan la'aanta goobta ay hawshaasi ka socoto.

# 3. Habraaca Daraasadda

Warbixintani waxa ay adeegsatay habraacyo-cilmibaadhiseed oo isku-dhafan (mixed-methods), si loo qiimeeyo waxqabadka Soomaaliya ee ku aaddan kal-guddoonkeedii Golaha Ammaanka ee 2025–2026. Falanqayntani waxa ay ka duulaysaa waydiin dhextaal ah: Sidee bay guddoominta Golaha Ammaanku u saamaysay geeddisocodka dowlad-dhiska Soomaaliya, waa maxay se waxyaabaha go'aaminaya wax-ku-oolnimada hawlgalkeeda?

## 3.1 Xogta iyo Ilaha Tixraaca

Xogtan waxa la ururiyay intii u dhexeysay Noofeeber 2024 iyo Luulyo 2025, iyada oo loo marayo laba hannaan oo isbarkan:

- Dibu-eegista Diiwaannada (Documentary Review): Ilo-xogeedyada aasaasiga ah ee Qaramada Midoobay—oo ay ka mid yihiin qoraallada xog-kulameedyada, qaraarrada shirarka, iyo warbixinnada Xoghayaha Guud—ayaa si nidaamsan loo falanqeeyay. Waxa taas barbar socday falanqaymo lagu sameeyay warbixinno ka soo baxay xarumaha cilmibaadhista iyo ururrada caalamiga ah, iyo weliba sida oo kale warwarkii ay baahiyeen warbaahinta heer gobol iyo kuwa heer caalamiba.

- Waraysiyo Xog-ogaal ah: Waraysiyo ka duulaya su'aalo qoondaysan ayaa lala yeeshay saddex xeeldheerayaal oo aqoon durugsan u leh siyaasadda arrimaha dibadda Soomaaliya:  laba wasiir Arrimo Dibadeed oo hore iyo sarkaal ka tirsan wasaaradda Arrimaha Dibedda. Waraysiyadu waxa ay diiradda saareen awoodda haayadeed, isku-dubbaridnaanta arrimaha gudaha iyo habka loo diyaariyo mowqifyada heer qaran. Dammaanad dhowrsoon ayaa la siiyay aqoonsiga ka qaybgalayaasha, si loo dhiirrigeliyo furfurnaanta iyo daacadnimada.

### 3.2 Qorshe-hawleedka Falanqaynta

Natiijooyinka waxa loo falanqeeyay si qotadheer oo mawduucaysan, waxaana loo fasiray si waafaqsan aragtiyaha dowlad-dhiska. Habraacani waxa uu qiimeyn ku samaynayaa muddada shirguddoominta Soomaaliya ee Golaha Ammaanka, taas oo lagu cabbirayo heerka awoodda go'aan-qaadashada madaxbannaanida Soomaaliya, iyada oo laga duulayo xaaladaha dibudhiska haayadaha qaranka.

### 3.3 Abbaarta iyo Caqabadaha

Nooma suuragalin in aannu hello saraakiisha dowladda ee hadda ku sugan Muqdisho iyo kuwa jooga Xafiiska Ergada Joogtada ah-midkoodna—taas oo ku tusinaysa caqabadaha ka jira dhanka haayadaha iyo hufnaanta oo laftoodu xuddun u ah warbixintan. Waxa lagu soo gunaanadayaa isbarbardhig-xogeedyo ku saabsan dukumeentiyada dadweynaha iyo waraysiyada lala yeeshay masuuliyiin hore oo xog-ogaal ah, si loo xaqiijiyo sugnaanta falanqaynta.

## 4. Markii Koobaad ee ay Soomaaliya Shirguddoomiso Golaha Ammaanka (1971–1972): Halbeeg Muujinaya Awoodda Luntay

Hadda ma aha markii kobaad ee ay Soomaaliya shirguddoomiso Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay.

Jamhuuriyaddii Dimuqraaddiga ahayd ee Soomaalida ayaa toban sano uun kadib xornimada, markii koobaad loo doortay shirguddoonka Golaha Ammaanka 1971 ilaa 1972.[3] Waa intii lagu gudo jiray dowlad-dhiskii dowladdii dhexe. Xukuumadda Muqdisho waxa ay xilligaas lahayd haayad qaran oo leh siyaasad-arrimo dibadeed oo cad. Istaraatiijiyadaha diblimaasiyadda waxa hoggaaminayay Wasiirkii Arrimaha Dibedda Cumar Carte Qaalib, halka uu Xafiiska Ergayga Joogtada ah ee New York uu madax ka ahaa Danjire Cabdiraxmaan Caabbi Faarax,[4] oo ahaa dimlomaasi ruugcaddaa ah oo hore uga soo shaqeeyay Komishinka Dhaqaalaha Afrika u qaabilsan Qaramada Midoobay iyo Ururka Midowga Afrika (OAU). Qaabdhismeedkan ayaa gacan wayn ka gaystay iskudubbaridka siyaasadahii arrimaha dibadda ee xilligaas.

Diiwaannada kaydka taariikhiga ah, oo intooda badan laga soo qaatay duugreebaha Qaramada Midoobay, ayaa muujinaya dowlad firfircoon oo lahayd kaqaybgal wax-ku-ool ah.[5] Hadal uu Danjire Cabdiraxmaan ka jeediyay Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay ayaa tusaale u ah ka qaybgalkii siyaasadeed ee mabaadiida ku dhisnaa: "Maadaama tamarta dadkeenna iyo xoogga dowladdeennu hagayaan hawlaha qaran-dhiska, waxa aannu si buuxda u garowsannahay in aannu ka mid nahay quruumaha bulshooyinka caalamka…Hawsha aannu halkan u joognaa waa in aannu ka shaqayno caddaaladda, nabadda, iyo u dhammaanta sinnaanta."[6]

## 4.1 Kaqaybgallada iyo Waxqabadyada

Tallaabooyinkii diblomaasiyadeed ee Soomaaliya intii lagu guda jiray kalguddoonkii 1971–1972, waxa ka muuqata joogtayn istiraatiijiyadeed oo waafaqsan arrimaha caalamiga ah:

- Gaar ahaan, arrimihii halganka xoreynta Afrika— ee ay ka midka ahaayeen Southern Rhodesia (Zimbabwe), Namibia, iyo nidaamkii midab-takoorka ku salaysnaa ee Koonfur Afrika (apartheid)—dhammaantood, waxa ay Soomaaliya si firfircoon uga qayb qaadatay diyaarinta iyo soo jeedinta qaraarro caalami ah, iyada oo sida oo kale si joogto ah ugu codeysay mowqifka Ururka Midowga Afrika (OAU). Qaraar ay Soomaaliya ka soo jeedisay arrinta Southern Rhodesia waxa diiddamada qayaxan (veto) ku dadafaysay Dowladda Ingiriiska (United Kingdom).

- Marka loo eego arrimaha caalamiga ah, Soomaaliya waxa ay taageero u muujisay qaraarkii aqoonsiga dalka Shiinaha, sida oo kale, waxa ay Soomaaliya mowqif cad ka qaadatay arrimaha Bariga Dhexe, waxaanay ka qaybgashay doodo muhiim ah oo ku saabsanaa xakamaynta hubka iyo dagaalkii u dhexeeyay India iyo Pakistan.

---

3. United Nations Security Council, "Somalia," accessed January 17, 2026, https://main.un.org/securitycouncil/en/content/somalia
4. https://www.youtube.com/watch?v=y1qjNkKfQ-Y&ab_channel=NomadsandNations
5. United Nations Security Council, Verbatim Record of the 1616th Meeting, S/PV.1616 (December 28, 1971), 4.
6. Ibid.
7. "U.N. Security Council Meets in Adis Ababa" https://www.nytimes.com/1972/01/28/archives/un-security-council-meets-in-addis-ababa-today-to-discuss-the.html.

- Guul muuqata oo dhanka farsamada iyo diblomaasiyadda ah ayay Soomaaliya ka soo hoysay shirkii Golaha Ammaanka ee Addis Ababa ka dhacay bishii Jannaayo 1972, kaas oo ahaa fadhigii ugu horreeyay ee uu Golaha Ammaanku ku qabto qaaradda Afrika. Masuuliyiintii Soomaaliyeed waxa ay gacan weyn ka gaysteen qabanqaabadii shirka, waxaanay fursaddaas uga faa'iidaysteen in ay tilmaamaan xidhiidhka ka dhexeeya madaxbannaanida siyaasadeed iyo xornimada dhaqaale.[7]

## 4.2 Baaxadda Saamaynta Haayadda

Qaabdhismeedyada hawlgallada caalamiga ahi waxa ay muujinayaan in ay Soomaaliya lahayd awood shaqo oo qeexan iyo karti diblomaasiyadeed oo la taaban karo. Howlgallada Safaaraddu waxa ay si cad u muujinayaan awoodda ay Soomaaliya ku lahayd:

- Diyaarinta iyo doodaha qaraarrada caalamiga ah.
- Joogtaynta mowqifyada iyo ilaalinta doorka codbixineed ee ajendayaasha caalamiga ah.
- Kaqaybgalka arrimaha muhiimka ah iyo hawlaha farsamo ee baaxadda leh
- Soo bandhigidda siyaasadaha istaraatiijiga ah ee danaha qaranka ku xidhaya dhaqdhaqaaqyada xornimo-doonka iyo midnimadoonka Afrika.

## 4.3 Xaaladda Shirguddoon Golaha Ammaanka ee Hadda

Marxaladdan taariikheed waa tusaale cad oo la taaban karo, waxaanay muujinaysaa nidaamka diblomaasiyadeed, awoodda xirfadeed ee hawlwadeennada, isku-dubbaridnaanta istiraatiijiyadeed, iyo taageerada haayadeed ee suuragalisay in ay soomaaliya si buuxda uga qaybgasho hawlaha Golaha. Marka aynu falanqayntan uga dhinbiil qaadanno kal-guddoonka hadda ee Soomaaliya, sooyaalkaasi waa xaqiiqo aasaasi ah oo lagu qiimayn karo duruufaha, caqabadaha, iyo istiraatiijiyadaha kal-guddoonka maanta ee 2025–2026. Qaybta soo socotaa waxa ay qiimaynaysaa sida ay dowladda Soomaaliya ugu soo laabatay Golaha Ammaanka, iyada oo aan lahayn awood hanasho maamul oo buuxda, balse ku timid mashruuc dibudhis oo lagu soo celinayo awoodihii haayadeed ee ay Soomaaliya muujisay kalkeedii kobaad.

7. "U.N. Security Council Meets in Adis Ababa" https://www.nytimes.com/1972/01/28/archives/un-security-council-meets-in-addis-ababa-today-to-discuss-the.html.

# 5. Kal-guddoonkii labaad ee Soomaaliya (2025–2026): Soo Laabasho Ka Dhalatay Soo-kabasho, Balse aan Ku Iman Awood Buuxda

Aragtida dibudhiska ee lagu xusay qaybta kobaad waxa ay qaabaynaysaa xaqiiqada hawlgaleed ee Soomaaliya ku leedahay kaqaybgalka Golaha Ammaanka. Waxa ay abuuraysaysaa xiisad si cad u qeexan: Soomaaliya waxa ay qaadday tallaabooyin masuuliyadeed oo ay ku xaqiijinayso matalaad qarannimo, iyada oo uu dibudhis ku socdo haayadihii dowladeed ee saldhigga u ahaa awooddeeda qaranimo.Waajibaadkan laba-geesoodka ah—maamulidda arrimaha dibadda iyo dibudhiska haayadaha qaranka—ayaa muujinaya doorka ay Soomaaliya hadda ku leedahay kal-guddoonka Golaha Ammaanka. Qaybtani waxa ay falanqaynaysaa qaab-dhismeedka dowladeed ee waafaqsan hawshan, iyada oo si gaar ah u eegaysa awoodaha haayadeed ee hadda jira iyo waxyaabaha xaddidaya sidii ay Soomaaliya saamaynteeda diblumaasiyadeed ugu beddeli lahayd tallaabooyin siyaasadeed oo wax-ku-ool ah. Falanqayntani waxa ay ka bilaabmaysaa lafagurka qaabdhismeedyada maamulka ee asaasiga ah, iyada oo si tartiibtartiib ah ugu fidaysa madalaha diblomaasiyadeed ee ugu muhiimsan, isla markaana raadraacaysa xidhiidhka ka dhexeeya horumarka haayadeed iyo waxqabadka hawlgalka.

## 5.1 Kashaqaynsiinta Qaranimada Iyada oo la Dhisayo Dowladnimada

Shirguddoominta Golaha Ammaanka ee ay Soomaaliya hayso waxa ku gadaaman isdiiddooyin aasaasi ah: Soomaaliya waa in ay awooddeeda qarannimo si buuxda uga dhex muujisaa masraxadda siyaasadeed ee caalamiga ah, iyada oo lafteedu weli ku jirta qabyo dowladeeed. Tani waa halxidhaale guul ku suntay oo lammaanaynaysa shaqo qaran iyo horusocod dowlad-dhiseed.[8] Si kastaba ha ahaatee, iskuma sargo'na awoodda Soomaaliya iyo jawigan cakiran ee la xidhiidha loollankan diblomaasiyadeed awoodda ku dhisan. Soomaaliya waxa ay Golaha Ammaanka ku soo biirtay xilli aanay haysan khayraadkii looga baahnaa xafiiska siyaasadda arrimaha dibadda iyo istaraatiijiyado go'aan-qaadasho oo iswaafaqsan.

Sidaa awgeed, inkasta oo uu joogitaanka Soomaaliya ee Golaha Ammaanku yahay astaan soo-kabasho iyo guul istiraatiiji ah oo la taaban kar. Sida oo kale waxa ay ka dhigan tahay fagaare siyaasadeed oo lama huraan u ah hirgalinta awoodaha looga baahan yahay waaritaanka dowlad-dhiska Soomaaliya. Qaybta soo socotaa waxa ay si qotadheer ugu kuurgalaysaa hannaanka isdiiddooyinka aasaasiga ah ee ka dhex jira qaabdhismeedka haayadaha dowladeed.

8. "Somalia joins UN Security Council after more than 50 years," Voice of America, June 6, 2024, https://www.voanews.com/a/somalia-joins-un-security-council-after-more-than-50-years-/7646503.html.

## 5.2 Maamul ku Tiirsan Shakhsiyaad, oo  aan Ku Dhisnayn Nidaam

Guud ahaan wasaaradaha Soomaaliya waa kuwo weli ku jira marxalad dhisme, iyada oo aanu si buuxda u dhammaystirmin qaabdhismeedka maamulka casriga ah. Tani waxa ay abuurtay goldaloolo cawaaqibkeedu xun yahay: waxqabadka haayadaha dowladdu waxa uu noqday mid ku tiirsan hindisayaasha iyo kartidada shaqsiyaadka, halkii uu ka noqon lahaa mid raacaya nidaamyo haayadeed oo joogto ah. Si kastaba ha ahaatee, arrintani waxa ay dowladda ka dhigtay mid ay nuglaysay wareegto hoggaamineed. Sidaas darteed, iskushaandhaynta ama iskubeddelka wasiirrada xukuumadda ayaa noqotay mid joogto ah — waxa aynu tusaale u soo qaadan karnaa iskubeddelka Axmed Macallin Fiqi oo isaga oo wasiirka Arrimaha Dibedda ah loo beddelay Wasiirka Gaashaandhigga, islamarkaana lagu beddelay Cabdisalaan Cabdi Cali bishii Abriil 2025 — taasi waxa ay meesha ka saartay aqoontii xirfadeed ee looga baahnaa jagooyinka hoggaamineed ee mudnaanta u leh horumarka qaranka.[9] Haddii aynu hoos ugu sii daadegno, afartii sano ee ugu danbeeyay Xukuumadda Madaxweyne Xasan Shiikh waxa ay magacawday afar Wasiir Arrimo Dibadeed, tii Faraamajana shan baa isku-beddelay:  Habdhaqankani waxa uu muujinayaa jaahwareer hoggaamineed oo dabadheeraaday, waxaanu curyaaminayaa habsamisocodka siyaasadeed ee qaranka.  Marka loo eego kal-guddoominta Soomaaliya ee Golaha Ammaanka oo muddadiisu tahay laba sano, habdhaqankani ma aha mid abuuri kara halbeeg siyaasadeed oo joogto ah, waana caqabad istiraatiiji ah oo weyn.

## 5.3 Marxaladda Kalaguurka ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda

Wasaaradda Arrimaha Dibedda, waxa si weyn uga soo ifbaxay caqabado ku gadaaman tallaabooyinka horumarka. Waraysiyada lala yeeshay masuuliyiinta hadda joogta iyo kuwii hore u joogay, waxa ay muujinayaan hal cillad oo isku mid ah: Wasaaradda Arrimaha Dibedda ma laha qaabdhismeed haayadeed iskudubbadhacsan.[10] Halkii ay Wasaaraddu ka noqon lahayd haayad ku shaqaysa nidaamiyeyaal istaraatiijiyadeed oo leh hamsamisocod, waxa ay ku shaqeysaa qaabdhismeedyo la soo dheegtay, maadaama oo aanay jirin nidaamyo rasmi ah oo ku habboon hawlaha iyo hiraallada shaqo ee wasaaradda. Tani waxa ay ku qasbaysaa in haayaddani noqoto mid ku dhisan shabakado shaqsiyaad, maadaama aanay lahayn qorshe-hawleed istaraatiijiyadeed oo dhammaystiran.  Taasina waxa ay abuuraysaa jawi aan xasiloonayn oo u gogol-xaadhaya masuuliyad xumo guudeed iyo cadaadisyo dibadeed.

9. "Somalia's prime minister appoints new defence minister in reshuffle" Reuters, April 27, 2025, https://www.reuters.com/world/africa/somalias-prime-minister-appoints-new-defence-minister-reshuffle-2025-04-27/.
10. Author interviews with current and former MFA officials, March–July 2025 (INT-01, INT-02, INT-03).

Xog-ogaalkii aannu arrintan ka waraysannay waxa ay iftiimiyeen in magacaabisaha dimlomaasiyadeed ay soo foodsaaraan cadaadisyo siyaasadeed oo joogto ahi, kuwaas oo ay ku jiraan codsiyo ka yimaadda saraakiisha sarsare oo inta badan ka dul tallaabsada doorsoocashada ku dhisan aqoonta iyo waayo-aragnimada. Qaar ka mid ah kaqaybgalayaasha ayaa xusay in qaabdhismeedyada sharci ee jira, sida Sharciga Adeegga Dibedda, mararka qaar loo adeegsaday in lagu hor istaago magacaabista shaqsiyaad aan u qalmin jagadan, balse ay hirgelintiisu weli tahay mid aan joogto ahayn. Sida oo kale, waxa walaacyo laga muujiyey ku-takri-falka mudnaanta diblomaasiyadeed, iyada oo ay jiraan tirakoobyo sheegaya in baasaboorro badan oo diblomaasiyadeed ah loo qaato si ka baxsan baahiyaha rasmiga ah ee haayadda, taas oo muujinaysa sida qaraabo-kiilku u wiiqay hufnaanta iyo daacadnimada nidaamka.[11]

Waxa xaaladda uga sii daray dhibaatooyinka la xidhiidha dhiirrigelinta taban ee ka dhalatay xisaabaha qaldan ee awood-qaybsiga 4.5. Diblomaasiyiinta, oo ay ku jiraan danjireyaashu waxa inta badan lagu soo xulaa aragtiyaha awood-qaybsiga nidaamka 4.5 iyo heshiisyo ay gadhaan daneeyeyaasha siyaasadeed ee muhiimka ahi. Taasi waxa ay dhashay in la shaqaalaysiiyo diblomaasiyiin tiro badan balse tamar daran oo tayadooda farsamo liidato, maadaama lagu buuxiyo magacaabis siyaasadeed oo inta badan ka madhan tababar diblomaasiyadeed iyo aqoon luqadeed oo ku filan. Waxa jira ifafaalo togan oo cusub—sida dhallinyaro diblomaasiyiin oo ku soo biirtay saaxadda diblumaasiyadda oo ka soo aflaxay deeqo-waxbarasho, iyo weliba xasillooni shaqo oo ka soo korodhay dhanka ilaha khayraadka asaasiga ah—hase yeeshee, horumarradani weli waa kuwo curdin ah oo aan gaadhsiisnayn heerkii looga baahnaa nidaam iskii u shaqaynaya oo ku dhisan xeerar cadcad. Qabyo weyn baa jirta, marka loo eego in haayadda shaqadeedu ka korto hoggaaminta ku dhisan shaqsiyaadka, loona guuro nidaam sharci ku dhisan oo shaqaynaya.[12]

## 5.4 Isqardhaafka Hawlgalka Dibedda

Xafiisyada Ergooyinka Soomaaliya ee ku yaalla dalalka dibeddu waa kuwo aan iswaafaqsanayn oo u fiday si aan nidaamsanayn, waayo waxqabadkoodu aad buu u kala duwan yahay. Inkasta oo qaar ka mid ahi si macquul ah u shaqeeyaan, haddana tiro badan ayaa la ildaran dhaqaale darro iyo shaqaale yari joogto ah: qaar ka mid ah waxaa hoggaamiya shaqsiyaad leh khibrad diblomaasiyadeed oo aad u xaddidan; qaar kale na waxa ay la daalaadhacayaan hawlaha aasaasiga ah ee qunsuliyadda oo xataa ma laha awood ay ku fuliyaan waajibaadkooda shaqo.[13] Maqnaanshaha nidaam haayadeed oo ku dhisan doorsoocasho aqooneed iyo karti xirfadeed iyo weliba saameynta ka dhalatay awood-qaybsiga qabiilka ku salaysan ayaa keenay magacaabisyo farsamada aqooneed ka doorbida dheellitir siyaasadeed oo qabiilaysi iyo nin jeclaysi ku dhisan.

11. Interview with former Minister of Foreign Affairs, May 2025 (INT-03).
12. Interview with former Minister of Foreign Affairs, May 2025 (INT-02).
13. Interview with MFA official, June 2025 (INT-03).

Tababarradu way sii kordhayaan, balse waa kuwo aan dhisayn cudud shaqaale oo midhadhal leh, sababta oo ah ma aha kuwo iskudubbarridan, kumana taxaluqaan qaabdhismeedka shaqada.[14] Haddaba iIlaa la dhiso shaqaale qunsuliyadeed oo xirfad aqooneed iyo karti diblomaasiyadeed ku qalabaysan, diblomaasiyadda caalamiga ah ee Soomaaliya waxa ay ahaanaysaa mid nasiibku darawaliyo halkii ay ka yeelan lahayd nidaamyo istaraatiijiyadeed oo raacaya hagayaal qorshaysan.

## 5.5 Hawlgalka Joogtada ah ee New York

Hawlgalka Joogtada ah ee ay Qaramada Midoobay ku leeyihiin New York, waxa uu ku shaqeeyaa jawiga ugu cakiran, uguna cadaadiska badan ee ay ku gadaaman yihiin filashooyinka sarsare iyo awoodaha ismuquunintu.  Inkasta oo Hawlgalka Joogtada ah ee Soomaaliya u fadhida xafiiska Qaramada Midoobay ee New York lagu ammaano "diblomaasiyiin hawlkar ah oo khibrad leh," haddana waxa si weyn u xaddidaya yaraanta ilaha kheyraadka iyo awoodda khubaro leh takhasusaad aqooneed (tusaale ahaan, qareenno iyo dhaqaalyahanno).[15]

Caqabadaha ku gadaaman Hawlgalka Soomaaliya ee New York waa kuwo la xidhiidha qaabdhismeedka oo qotodheer. Waxa ka shaqeeya koox yar oo qabta hawlo aasaasi ah, kuwaas oo intooda badani yihiin shaqaale joogto ah oo lagu kaabay la-taliyayaal kumeelgaadh ah. Shaqaale yaraantani waxa ay saamayn toos ah ku yeelatay khasaaraha la xidhiidha qaabdhismeedka Golaha. Awood la'aanta ergadu waxa ay keentay in ay daboolaan wada-tashiyada aan rasmiga ahayn ee is barbar socda—kuwaas oo ay xubnaha joogtada ah (P5) iyo qoraayada qaraarradu (penholders) ku qaabeeyaan qaraarrada—waxay si toos ah u lumisaa fursado istiraatiiji ah, isla markaana ka dhigtaa joogitaankeeda hawlgal mid u badan falcelin kaliya.

Awood la'aanta howlgalka ee ah inuu daboolo wadatashiyada aan rasmiga ahayn ee isku mar dhaca, kaas oo P5 iyo kuwa haysta qorayaasha ay ku qeexaan qaraarada, waxay meesha ka saaraysaa fursadaha muhiimka ah si aan toos ahayn waxayna ka dhigaysaa joogitaankeeda hawlgalku mid si buuxda uga falceliya.

Xafiiskani karti buuxda uma laha in uu daboolo siyaasadaha la xidhiidha qaraarrada kulan-doceedyada aan rasmiga ahayn, halkaas oo ay shanta P5-ta diidmada qayaxan lihi ku qaabeeyaan qaraarrada golaha, taasina waxa ay meesha ka saaraysaa fursadaha muhiimka ah, waxaanay si dadban u wiiqaysaa joogitaanka iyo falcelinta hawlgalka.

14. Ibid.
15. Interview with former Minister of Foreign Affairs, April 2025 (INT-02).

Mararka ay taagan yihiin doodaha ku saabsan arrimaha xasaasiga ah sida amniga marinbadeedyada ama nidaamyada cunaqabataynta — faylasha toos ula xidhiidha madaxbannaanida Soomaaliya — hawlgal aan lahayn msuuliyado cayiman ama awood qaraar-curineed wax badan kama qaban karo qaraarrada soo baxa in ay akhrintooda indhaha uun ku daaliyaan mooyaane, taas oo hindisayaasha dalalka awoodda leh ka dhigaysa kuwo ajendayaashoodu qaabeeyaan siyaasadaha jaahwareerinaya xasiloonida gobolka.[16]

Tani waa halka ay sartu ka qudhuntay: madaxbannaanida baahiyaha hawlgalku waa lagama maarmaan. Kaqaybgalayaashu waxa ay tilmaameen in hawlgalka qaabdhismeed la'aantu ugu wacan tahay go'aannada ka yimaadda Muqdisho ee aan ku dhisnayn wadatashiyada rasmiga ah. Sarkaal sare ayaa dooddiisa ku soo gabagabeeyay in wanaajinta Hawlgalku u baahan tahay "madaxbannaani weyn oo wasaaradeed oo uu weheliyo kormeer istaraatiijiyadeed oo koobani." Saamaynta qaabdhismeed ee maxalliga ah ayaa jaangoysa jagooyinka siyaasadeed ee hawlaha qunsuliyadda: Howlgalka New York waxaa inta badan ka shaqeeya ama lagu kaabaa magacaabis siyaasadeed oo aan ku dhisnayn aqoon dublimaasiyadeed iyo khibrad shaqo oo waxtar leh, taas oo culays dheeraad ah ku sii noqotay xirfad yaraanta jirta iyo korodhka khatarta iskubedbeddelka shaqaalah. Inkasta oo ay caqabadahani jiraan, haddana waxa Hawlgalka lagu ammaanaa in uu casharro dublimaasiyadeed oo degdeg ah ka qaato waayo-aragnimada siyaasadeed ee marxaladaha xawaaraha ku socda.[17]

## 5.6 Dood ku Dhisan Ujeeddooyinka Dowlad-dhiska

Dood kasta oo ku saabsan Kal-guddoonka Golaha Ammaanka ee Soomaaliya waa in lagu saleeyaa laba xaqiiqo oo aasaasi ah: Marka kobaad, dowladda Soomaaliya waxa ay ka qaybqaadanaysaa haayadda ugu awoodda badan Qaramada Midoobay, iyada oo si firfircoon uga soo kabanaysa tobannaan sano oo burbur haayadeed ah; joogitaanka hawlgalka ee joogtada ah oo keliya ayaa ka dhigan guul weyn oo muhiim ah. Mar labaadka, qiimeynta saxda ah ee haayaddan waxa kala dhantaalaya xaddidnaanta hufnaanta tallaabooyinkeeda diblomaasiyadeed. Waxa ay u badan tahay in madmadowgani yahay istaraatiijiyad ula kac ah marka loo eego heemaalka marxaladdan dawladda ee kalaguurka, halkaas oo ay isgaadhsiinta aan caadiga ahayni inta badan ka sarreyso warbixinta rasmiga ah. Waxa kale oo aan weli horumarin haayadaha qaabilsan abuurista iyo faafinta jagooyinka siyaasadda.

16. Ibid.
17. Interview with MFA official, June 2025 (INT-03).

Marka loo eego xaaladaha jira, falaqaynta wax dhisaysaa waa in ay cabbirtaa heerka horumarka, iyada oo diiradda saaraysa ujeeddada guud ee kal-guddoonka: in ay u shaqeeyo sidii qalab dibudhiseed oo qaran. Kaqaybgalka Soomaaliya waxa lagu qiimayn karaa afar ujeeddo oo isku xidhiidhsan, kuwaas oo ay midkastaa u taagan tahay marxalad dib loogu dhisayo awoodda diblomaasiyadeed: Joogitaanka (Ismuujinta), Geeddisocodka (Isku-dubarridnaanta), Haayadda (Saamaynta), iyo Madaxbannaanida (Natiijooyinka midho-dhalka leh). Qiimaynta udubdhexaadka ahi waa hoosaynta horumarka haayadda, sidaas darteed, waxqabadka Hawlgalka Soomaaliya illaa hadda waxa uu ku kooban yahay marxaladda aasaasiga ah ee koowaad.

### 5.6.1 Horumarka Muuqda iyo Goldaloolooyinka Nidaaminta

Soomaaliya si aan cidina dafiri karin ayay ugu guulaysatay xaqiijinta joogitaankeeda. Geeddigalinteeda oo ka bilaabantay xubin gole-joog ah, islamarkaana noqtay xubin codbixin leh ayaa ah guul siyaasadeed taariikhi ah, taasina waxa ay tusaale cad u tahay dibusoo-noolaynta dawladnimada Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, waxqabadkan muuqda ayaa u muuqda mid aan ku tiirsanayn Geeddisocodka nidaamka maxalliga ah. Kutiirsanaanta hababka magacaabista siyaasadaysani waxa ay tusaale u yihiin nidaam aan weli yeelannin waxqabadka haayadeed oo si madaxbannaan ula jaanqaadaya masraxa caalamiga ah, kaas oo si dhammaystiran u metelaya mabaadiida ku salaysan awoodaha dowladeed ee la xidhiidha kobcinta xirfadaha iyo kartida cududda shaqaalaha.  Farqiga u dhexeeya joogitaanka dibedda iyo nidaaminta gudaha ayaa muujinaya in guusha ugu weyn ee ilaa iyo hadda la gaadhay tahay mid soo kabasho, oo aan weli waafaqsanayn awoodda haayaddeeda.

### 5.6.2 Samaynta Xidhiidhada iyo Xannibaadda Istaraatiijiyadeed

Goluhu waxa uu bixiyaa fagaare leh shir-doceedyo isbarbarsocda, kuwaas   oo loogu talagalay isdhexgalka diblomaasiyadeed. Hawlgalka Soomaaliya waxa uu abuuray xidhiidho badan oo muhiim ah si ay u dhisaan joogitaan aasaasi ah oo shabakado diblimaasiyadeed. Caqabadaha jiraa waxa ay salka ku hayaan baahida loo qabo in laga gudbo marxaladda kumeelgaadhka ah loona gudbo hannaan istaraatiiji ah oo qorsheysan. U gudbidda hannaanka istaraatiijiga ah ayaa ah caqabadda ugu weyn ee taagan. Sidaas awgeed, xidhiidhadu waxa ay u muuqdaan kuwo lagu kobciyo dublimaasiyadda heer shaqsi, halkii ay dawladdu si nidaamsan ugaga faa'iidaysan lahayd horumarin qaran oo ku dhisan ajandeyaal qeexan. Qaabkani waxa uu muujinayaa in ay jirto fursad muhiim ah oo lagu xoojin karo dibu-isuguxidhka hawlaha kala-daadsan ee baaxadda leh ee ka dhex jira xidhiidhada aan firfircoonayn iyo dhisidda iskaashi wax ku ool ah.

## 5.6.3 Qalooca Waxbarasho ee Kumeelgaadhka ah

Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay waxa uu u shaqeeyaa sidii dugsi diblomaasiyadeed oo akademi ah. Diblomaasiyiinta Soomaaliya waxa ay halkaas ka heleen khibrad muhiim ah, oo si dadban ugu timi Joogitaankooda iyo tababarrada la xidhiidha u carbinta shaqada. Si kastaba ha ahaatee, tababarkani waxa uu u muuqdaa mid ku yimid si aan qorshaysnayn habaqle ama tabaqdhoon ah. Ereyga looma isticmaali karo si istaraatiiji ah barnaamij qaran oo lagu dhisayo awoodda maadaama uusan jirin hab la cabbiri karo oo ay dawladdu waddo. Waxbarashadu waxay u muuqataa inay ku urursan tahay kooxda yar ee New York, mana jirto farsamo cad oo lagu wareejinayo macluumaadka cusub iyo hufnaanta habraaca dib loogu celinayo Muqdisho si loo taageero adeegga dibadda ee ballaaran. Tani waxay soo jeedinaysaa fursad lumay oo lagu beddeli karo ballan sharaf leh maalgashi caqli badan oo lagu sameeyo caasimadda diblomaasiyadeed ee muddada dheer ee qaranka. Waxbarashadu waxa ay u muuqataa in ay ku urursan tahay kooxda New York, iyada oo aanay jirin qaabdhismeedyo cadcad oo qeexaya jidka loo marayo qaybinta macluumaadka la bartay iyo in Muqdisho lagu soo celiyo khibradaha diblomaasiyadeed si loo horumariyo adeegga arrimaha dibedda ee baaxadda leh. Waxa ay muujinaysaa fursad la seegay oo loo beddeli lahaa xil qaali ah oo dalka u soo jiida maalgashi istiraatiji ah oo lagu xoojinayo awoodda diblomaasiyadeed ee mustaqbalka fog.

## 5.6.4 Hannaanka Kutiirsanaanta-Madaxbannaanida

Si loo sii anbaqaado sii muujinta arrimaha lafdharta u ah danaha qaranka, waa in la awdaa goldaloolooyinka ka dhex jira Joogitaanka Hawlgalka lana buuxiyaa shuruudaha lagama maarmaanka u ah Geeddisocodka Hawlgalka iyo horumarinta Haayadda.  Inkasta oo la-dagaallanka argagixisanimada ay tahay mawduuc soo noqnoqda, ilaalinta sharafta dhuleed waxa ay noqotay arrin uur-baadhkeedu (case study) aad u adag yahay. Kuluglahaanshaha arrimaha muhiimka ah ee la xidhiidha madaxbannaanida waxa ay u muuqdaan kuwo falcelin ku dhisan, sida ka muuqata heshiiska Itoobiya–Somaliland (MoU), halkii uu ka noqon lahaa mid uu hagayo hannaan-istiraatijiyadeed oo dhammaystirani, kaas oo si firfircoon uga faa'iidaysanaya awoodda buuxda ee Golaha. Mowqifkan falcelinta ku dhisan waxa uga sii daray goldaloolada qaabdhismeed ee la xidhiidha in Soomaaliya amni ahaan iyo dhaqaale ahaanba si weyn ugu tiirsan saaxiibada caalamiga ah. Kutiirsanaantani waxa ay abuurtay xannibaad muuqata, taas oo qaabaynaysa habdhaqanka codbixinta ee arrimaha aan udub-dhexaadka ahayn, islamarkaana adkaynaya khadadka diblomaasiyadeed oo madaxabannaan. Qaabka muuqdaa ma aha mid ku salaysan mabaadii iyo xaqiiqa toonna, balse waa mid muujinaya awood-falcelineed oo ay xaddidayaan xaqiiqooyinka dhismeed, taas oo joogitaanka hwlgalka ka dhigaysa mid astaan magaceed ah, oo aan soo saaraynin natiijooyin madaxbannaan oo saamayn leh– taasina waa carqalad laxaad leh.

## 5.7 Guusha la Gaadhay, Awood Hawlgal oo Horumar ku Dhisan

Xogaha la helay waxa ay muujinayaan in Soomaaliya si guul leh uga faa'iidaysatay kal-guddoonkeeda Golaha, si ay u xaqiijiso soo-laabashadeeda siyaasadeed, iyada oo gaadhay marxaladda koowaad ee Joogitaanka Hawlgalka oo ah mid muhiim ah. Si kastaba ha ahaatee, marka lagu cabbiro ujeeddada ballaadhan ee ah in kursigan loo adeegsado qalab lagu horumarinayo dowlad-dhiska, horumarkani waxa uu u muuqdaa mid kooban, marka loo eego sababo la xidhiidha nidaamyada maxalliga ah ee aan weli si buuxda u bislaan. La'aanta hannaan istiraatijiyadeed oo muuqda—gaar ahaan kuwa khuseeya isku-dubbaridka, magacaabista, tababarrada, iyo dejinta ajandeyaal wax ku ool ah — ayaa wiiqay in uu hawlgalku yeesho karti buuxda.

# 6. Caqabadaha iyo Fursadaha ku Gadaaman Dolwad Sookabanaysa

Awoodda ay Soomaaliya ay uga faa'iidaysan karto kursigeeda Golaha Ammaanka ma qaabeeyaan haayadaha gudaha oo keli ahi, balse sida oo kale waxa uu qaabeeyaa jawiga hawlgalka dibedda. Jawigani waxa uu soo iftiiminayaa caqabado iyo arrimo u baahan tixgelino gaar ah— kuwaas oo ay ka mid yihiin dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee gudaha, xiisadda diblomaasiyadeed ee heer gobol iyo tafaraaruqa ka dhex jira nidaamka—kuwaas oo qeexaya xaqiiqada uu ku shaqaynayo hawlgalku. Waxkaqabashada xaaladdani waxa ay u baahan tahay in la sameeyo qiimayn indho-fiiqan oo loogu kuurgalayo qodobbada kor ku xusan si loo abuuro istaraatoojiyad waxku-ool ah.

## 6.1. Dhaqdhaqaaqyada Gudaha: Iswaafajinta Dibudhiska Gudaha iyo Matalaadda Dibadda

Mashruuca dibudhiska qaranka ee aan weli dhammaystirmini waxa uu si toos ah u saameeyaa iskudubbaridka iyo awoodda codka Soomaaliya ee Golaha Ammaanka. Kal-guddoominta xubinnimada Golaha waxa ku lammaan caqabado maxalli ah oo weli jira, kuwaas oo saamayn ku yeelan kara waxtarka diblomaasiyadeed.

### Kala-qaybsanaanta Siyaasadeed:

- Xidhiidhka isbedbeddelaya ee u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada mararka qaarkood waxa uu abuuraa mugdi ku yimaadda dejinta siyaasadda. Khilaafaadka ku saabsan maamulka iyo kheyraadka ayaa wiiqi kara qeexidda mowqif qaran oo mideysan, taas oo keeni karta dibudhac ama is-khilaaf ku yimaadda halbeegyada u dejisan Hawlgalka Joogtada ah ee New York. Dhaqdhaqaaqyadani waxa ay halis u yihiin soo ifbixidda qaabdhismeedyo diblomaasiyadeed oo kala daadsan, gaar ahaan marka lala macaamilayo saaxiibbada caalamiga ah.

### Mudnaanta Amniga:

- Handidaadda joogtada ah ee ka timaadda al-Shabaab waxa ay caqabad weyn ku tahay feejignaanta istaraatiijiyadeed iyo awoodda maamulka ee dowladda. In diiradda la wada saaro amniga iyo xasilloonida ayaa xaddidi karta awoodda loo heli karo qorsheynta mustaqbalka fog ee firfircoon ee ku habboon diblomaasiyadda saamaynta leh ee Golaha. Sidaas darteed, Hawlgalku waxa uu matalayaa dowlad maamulkeeda maalinlaha ahi si weyn ugu tiirsan yahay maaraynta xaaladaha degdegga ah.

### Dhaqaalaha Siyaasadeed ee Kumeelgaadh ah:

- Horumarinta adeeg rayid oo ku saleysan karti iyo mudnaansiin ayaa weli ka socda haayadaha arrimaha dibadda. Sida hore loo xusay, siyaasadeynta magacaabista ayaa weli caqabad ku ah doorsoocasho buuxa. Jawigani waxa uu wiiqi karaa dhismaha adeeg diblomaasiyadeed oo isku dubbadhacsan, kuna saleysan khibrad, taas oo adkaynaysa samaynta isbahaysiyo waara oo ku dhisan kalsooni—kuwaas oo muhiim u ah saameynta xubnaha E10.

Isku soo wada duuboo, xoojinta arrimaha maxalliga ahi waxa ay lafdhabar u yihiin dejinta habraacyo gudeed oo midho-dhal leh, kuwaas oo lagama maarmaan u ah in laga guuro joogitaan aasaasi ah, loona gudbo awood waxqabad oo joogto ah.

## 6.2. Diblomaasiyadda Gobolka: Madaxbannaanida oo ah Mudnaanta ugu Weyn ee Golaha

Caqabadaha diblomaasiyadeed ee Soomaaliya ku xeeran badankoodu waxa ay ka yimaaddaan deegaan goboleedka ku xeeran, halkaas oo madaxbannaanideedu wajahayso cadaadisyo badan oo isku-dhafan.

Natiijadu waa kal-guddoominta xubinnimo ee Golaha Ammaanka, taas oo aanay ilaalinta dhuleed oo keli ahi u lahayn mudnaanta siyaasadeed ee ugu muhiimsan, balse noqota xudunta diblomaasiyadda.

## • Kal-guddoonka Cusub: Xiisadda ka Dhalatay Aqoonsiga Rasmiga ah

Go'aankii Diseembar 2025 ee ay Israa'iil ku aqoonsatay Jamhuuriyadda Soomaalilaan ee goonni-goosadka ah, waxa uu ka dhigan yahay caqabad ugub oo ka duwan kuwii hore. Si ka duwan faragelinta goboleed ee ku dhisan wakiillo ama habab aan rasmi ahayn, aqoonsi rasmi ah oo ka yimaadda dowlad xubin ka ah Qaramada Midoobay waxa uu isku dayayaa in uu u beddelo sheegashada Soomaaliya ee heerkeedu hooseeyo — marka loo eego xaquuqaha sharci ee caalamiga ah. Muhiimaddu kama timaaddo Israa'iil lafteeda, balse waxa ay ku jirtaa tusaalaha ay rabto in ay dejiso. Soomaaliya, tani waxa ay ka dhigaysaa Golaha Ammaanka meel ka baxsan diblomaasiyad guud oo keliya, waxaanay u beddelaysaa gaashaan diblomaasiyadeed oo lagama maarmaan ah—mid ka mid ah meelaha yar ee madaxbannaanida lagu difaaci karo iyada oo loo marayo diiwaan, habraac, iyo kucelcelin rasmi ah.[18]

## • Ku Luglahaanta Imaaraadka Carabta ee Gobolka

Imaaraadka Carabta waxa uu hirgeliyay istaraatiijiyad goboleed oo si nidaamsan ula macaamisha jilayaasha siyaasadeed ee dowlad goboleedyada, iyada oo lagu xadgudbayo dowladaha dhexe ee Soomaaliya. Soomaaliya gudaheeda, taageerada joogtada ah ee siyaasadeed, dhaqaale, iyo kuwa saadka ee loo fidiyo dowladda Somaliland iyo qaar ka mid ah maamul-goboleedyada ayaa xoojiyay qaab-dhismeedyo awoodeed oo is barbar socda, isla markaana wiiqay mideynta federaalka. Habdhaqankani waxa uu la mid yahay kuwo lagu arkay Yemen, Suudaan, iyo Liibiya, halkaas oo taageerada dibedda ee kala qaybsanaanta ay sii dheereynayso xasillooni-darrada, iyada oo la ilaalinayo saameynta istaraatiijiyadeed. Soomaaliya, tani waxa ay ku noqotay caqabad qaabdhismeed oo muddo dheer soo jiitantay: caadiyeynta xidhiidhka dibedda ee jilayaasha gudaha loola yeesho sidii oo ay ay yihiin dowlado madaxbannaan.[19]

## • Dadaalka Itoobiya ugu Jirto Helitaanka Badda

Ujeeddada istaraatiijiyadeed ee Itoobiya ka leedahay helitaanka marinbadeed waa mid soo jireen ah, heshiiskii is-afgarad ee bishii Jannaayo 2024 dhex maray Soomaalilaan iyo Itoobiya, waxa uu si rasmi ah u beddelay doodda Soomaalilaan waxaanu ka dhigay caqabad toos ah oo ku wajahan midnimada dhuleed ee Soomaaliya.

---

18. "Israel becomes first country to recognise Somaliland."Al Jazeera. December 26, 2025. https://www.aljazeera.com/news/2025/12/26/israel-becomes-first-country-to-recognise-somaliland. (Accessed January 18, 2026)
19. Andreas Krieg, "How Abu Dhabi Built an Axis of Secessionists across the Region," Middle East Eye, March 28, 2025, last updated November 2024. https://www.middleeasteye.net/big-story/abu-dhabi-built-axis-secessionists-across-region-how. (accessed December 15, 2024),

Iyada oo la tixraacayo taariikhda faragelin-siyaasadeed iyo milatari ee Addis Ababa, heshiis kasta oo noocaas ahi waxa uu ka dhigan yahay hanjabaad qotadheer oo leh saameyn raadayn iyo hawlgalba leh. Soomaaliya, tani waxa ay u tarjumaysaa waajib diblomaasiyadeed: in la hubiyo in madal kasta oo caalami ah—oo uu ku jiro Golaha Ammaanku—ay mar walba dib u xaqiijiso xurmada sharci ee xuduudaheeda, isla markaana kor loo qaado kharashka siyaasadeed ee dowlad kasta oo isku dayda in ay wiiqdo.[20]

### • Muranka Badda ee Kenya

Inkasta oo xukunkii maxkamadda ICJ ee 2021 uu u hiiliyay Soomaaliya, haddana ku adkaysiga Kenya ee sheegashooyinka badda waxa uu sii wadaa khilaaf diblomaasiyadeed oo aasaasi ah. Kaqaybgalka siyaasadeed iyo ka amni ee Nairobi ee Jubbaland waxa uu sii xumaynayaa xidhiidhka labada dhinac, isaga oo keenaya xiisado la xidhiidhka dhuleed iyo maamulba. Soomaaliya, arrintani waxa ay uga baahan tahay feejignaan diblomaasiyadeed oo joogto ah, si loo ilaaliyo guusha sharciyeed, loogana hortago in madaxbannaanida loo wiiqo si tartiibtartiib ah, iyada oo loo marayo dhaqanno diblomaasiyadeed iyo dhacdooyin xaqiiqi ah.[21]

Isku darka guud ee arrimaha gobolka ka taagan ayaa mawduuca madaxbannaanida qeexaya ka dhigaya mid mudnaan u leh kal-guddoonka Soomaaliya ee 2025–2027. Guusha laguma cabbiro bilaabidda ajandeyaal cusub, balse waxaa lagu cabbiraa hubinta in jebinta midnimada dhuleed—ha noqoto mid diblomaasiyadeed, mid siyaasadeed, ama mid milatari— taas oo si joogto ah loo aqoonsado, loo diiwaangeliyo, loolana hortago nidaamka caalamiga ah.

## 6.3. Goobta Caalamiga ah: Maareynta Is-dheelitir La'aanta iyo Kala-qaybsanaanta

Heerka caalamiga ah, Soomaaliya waxa ay ka shaqaysaa laba xaqiiqo oo nidaamsan oo iskulammaan: xidhiidhada qaabdhismeedka ee ay la leedahay saaxiibbada caalamiga ah, iyo Golaha Ammaanka oo ay inta badan curyaamiyaan kala-qaybsanaanta quwadaha waaweyni.

### • Dhaqdhaqaaqyada Iskaashiga:

Dowladda Soomaaliya iyo waaxdeeda amniga waxa ay helaan taageero weyn oo ka timaadda saaxiibbada caalamiga ah, taas oo abuurta xidhiidh aan asal ahaan isu dheellitirnayn.

---

20. Afyare Elmi and Yusuf Hassan, "The Coming War between Ethiopia and Somalia," The New York Times, August 26, 2024, https://www.nytimes.com/2024/08/26/opinion/ethiopia-somalia-conflict.html.
21. International Court of Justice, "Maritime Delimitation in the Indian Ocean (Somalia v. Kenya)," Case No. 161. https://www.icj-cij.org/case/161. (Accessed December 15, 2024)

Inkasta oo taageeradani muhiim u tahay xasilloonida, haddana waxa ay soo kordhin kartaa kakanaansho go'aan-qaadasho siyaasadeed oo dibadeed, iyada oo suurtagal ka dhigaysa in mowqifyo aan ahayn kuwa asaasiga ah loo jaangooyo, si loo ilaaliyo iswaafajinta deeq-bixiyeyaasha muhiimka ah. Xaqiiqadan qaabdhismeed waa shardi qeexaya xorriyadda diblomaasiyadeed ee Soomaaliya.[22]

**• Golaha oo Kala-qaybsan:**

Kala duwanaanshaha qotodadheer ee u dhexaysaa P5 ee ku saasban arrimaha siyaasadda caalamiga ah sida Ukraine iyo Falastiin ayaa hoos u dhigay awoodda Golaha ee ahayd in uu qaado tallaabooyin wadajir ah. Dal sida Soomaaliya oo kale ah, kala-qaybsanaantani waa caqabad istaraatiijiyadeed; waxaanay wiiqaysaa haayadda lafteeda, taas oo bixisa nidaam ku dhisan xeerar looga faa'iidaysan karo ka hortagga caqabadaha gobolka. Sida oo kale, waxa ay ku khasbeysaa in si taxaddar leh loo dhex maro xulafooyin isdiidan, iyada oo loo baahan yahay xisaab istaraatiiji ah oo sax ah oo khaladaadkeedu yar yahay.

Deegaankan caalamiga ahi waxa uu dalbanayaa mowqif ku dhisan xaqiiqooyin-garasho oo wax-ku-ool ah. Habdhaqanka Soomaaliya, oo lagu saleeyo habraacyo iyo dano muhiim ah ayaa raadin kara fursado gaar ah oo laga dhex fuliyo nidaam xaddidan.

# 7. Talooyin

## U Beddelidda Falanqaynta Ficil Dowladeed

Si joogitaankeeda culus ee Golaha Ammaanka loogu beddelo awood diblomaasiyadeed oo la taaban karo, Soomaaliya waa in ay fulisaa istaraatiijiyad diiradda lagu saarayo sannadka ugu dambeeya. Soo jeedimaha hoos ku xusani waxa ay mudnaan siinayaan tallaabooyin degdeg ah oo saameyn sare leh, kuwaas oo dhisaya awood aasaasi ah, difaacayana danaha madaxbannaanida, islamarkaana abuuraya isbahaysiyo diblomaasiyadeed oo lagama maarmaan ah, iyada oo la tixgelinayo waqtiga xaddidan iyo xaqiiqada siyaasadeed ee muddaysan.

22. Although there are no official documents detailing this dynamic, it is generally acknowledged among policy practitioners that Somalia's foreign policy positions at the United Nations are significantly constrained by its reliance on external partners, particularly the United States. This reflects a long-standing structural reality for many post-independence African states serving as non-permanent members of the Security Council because economic dependency, security assistance, and institutional fragility often limit the scope for independent decision-making.

## 7.1. Xirfadaynta Adeegga Dibedda: Dhisidda Joogitaan Xirfadaysan

Si looga gudbo kafalcelin, loona gaadho diblomaasiyad firfircoon, Dowladda Federaalku waa in ay mudnaanta siisaa dhisidda koox diblomaasiyiin ah oo xirfad leh oo la isku halayn karo, kuwaas oo awood u leh in ay horumariyaan danaha istaraatiijiyadeed ee Soomaaliya ee Golaha Ammaanka.

### 7.1.1. Xirfad u eegista Magacaabisaha  Muhiimka ah ee la Xidhiidha Sharuucda Caalamiga ah

Magacaabista Ergada Joogtada ah ee Qaramada Midoobay ee New York waa in loo arkaa xilal xirfadeed oo heer sare ah, laguna hago shuruudo cadcad oo ku saleysan karti iyo aqoon. Xulashadu waa in ay mudnaanta siisaa khibrad ku habboon shaqada goobta, waxqabad la xaqiijiyay, iyo u hoggaansanaanta heerarka adeegga dibadda.

Nidaamka hadda jira ee ku saleysan magacaabisyo kumeelgaadh ah oo siyaasadeysan ayaa si weyn u xaddidaya awoodda Soomaaliya ee saameynta doodaha Golaha. U gudbidda hannaan ku saleysan mudnaan waxa ay kobcin doontaa joogteynta, xirfadaynta, iyo xasuus reebka haayadeed—kuwaas oo lama huraan u ah maaraynta wadaxaajoodyo midho-dhal leh iyo qaabaynta natiijooyinka Golaha.

**Tallaabooyinka waxqabadka:**

- Hirgelinta shaqaalaysiin doorsoocasho iyo tartan furan oo hufan ku dhisan ayaa ku habboon xilalka diblomaasiyadeed ee New York.
- Dhisidda nidaam wareeg ah oo u oggolaanaya diblomaasiyiinta da'da yar in ay helaan waayo-aragnimo ka hor inta aanay Golaha qaban hoggaan.
- Abuuridda barnaamij tababar joogto ah oo ku saabsan wadaxaajoodka, habraacyada Golaha Ammaanka, iyo sharciga caalamiga ah, kaas oo si gaar ah u habeeyeen diblomaasiyiinta Soomaaliyeed.

### 7.1.2. Ku Darista La-taliyayaal Istaraatiiji ah oo Takhasus u Leh Mawduuca

Ergadu waa in ay heshiisyada ku darto khubaro kumeelgaadh ah (6–9 bilood) oo ku takhasusay sharciga caalamiga ah, nidaamyada cunaqabateynta, habraacyada Golaha Ammaanka, falanqaynta khilaafaadka, iyo diblomaasiyadda laba-geesoodka ah. Khubaradani waxa ay hagi doonaan mowqifyada Soomaaliya, tababarrada shaqaalaha Hawlgalka, waxaanay xoojin doonaan awoodda falanqaynta, iyada oo aan la carqaladeynaynin hawlaha jira.

**Tallaabooyinka waxqabadka:**

- Sameynta liis khubaro qaran iyo qurba-joog ah oo la hubiyay oo diyaar u ah in si degdeg ah loogu daro Ergada.
- Dhisidda iskaashi lala yeesho xarumaha cilmibaadhista iyo jaamacadaha, si loo helo taageero farsamo.
- Ka faa'iidaysiga wareejinta shaqaale ka imanaya wasaaradaha (Arrimaha Dibadda, Cadaaladda, Qorsheynta, Maaliyadda) si loo hanto khibrada gudaha iyo matalaadda caalamiga ah.

## 7.2. Xoojinta Isku-xidhka: Abuuridda Xudun Mideysan oo ku Saleysan Khibrad

Isku-dubbarrid istaraatiiji ah oo ka dhexaysa Muqdisho iyo Ergada Joogtada ah ee New York, ayaa lama huraan u ah in la helo siyaasad ku dhisan joogteyn, xawaare, iyo saameyn.

### 7.2.1. Dhisidda Koox Kaqaybgalka Hawlgalka Soomaaliya ee UNSC

In la sameeyo koox heer sare ah oo haayado badan ka kooban, kuwaas oo ay hoggaaminayso Wasaaradda Arrimaha Dibaddu, kana kooban wakiillo ka socda wasaaradaha muhiimka ah, Baarlamaanka Federaalka, iyo khubaro siyaasadeed. Kooxdani waxa ay:

- Isku dubbaridi doontaa mowqifyada siyaasadeed ee dowladda.
- Diyaarin doontaa warbixinno iyo hageyaal siyaasadeed oo loogu talagalay Ergada.
- Isku dubbaridi doontaa hawlgallo qaran oo ku aaddan qaraarrada, bayaannada, iyo codbixinta Golaha.

Iyaga oo u shaqaynaysa sidii xarun falcelineed oo degdeg ah, kooxdani waxa ay hubinayaan in fariimaha Muqdisho ay la jaanqaadaan tallaabooyinka waaqiciga ah ee New York.

### 7.2.2. Dhisidda Kayd Aqooneed iyo Shabakad Saaxiibbadeed

In la horumariyo xarun aqooneed oo dhijitaal ah, oo ay si wadajir ah u maamulaan Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Ergadu waa lama huraan, si loo diiwaangeliyo mowqifyada Soomaaliya, waayo-aragnimada wadaxaajoodka, casharrada la bartay, iyo falanqaynta mowduucyada Golaha Ammaanka.

**Tallaabooyinka waxqabadka:**

• In la hayo kayd online ah oo ammaan ah oo ay heli karaan safaaradaha iyo wasaaradaha.

• In la xoojiyo iskaashiga dalalka Afrika iyo Kooxda Carabta si loo adkeeyo isku-dubbaridka kooxaha.

• In la bilaabo "Toddobaadka Istaraatiijiyadda Soomaaliya-UNSC" oo ah mid sannadle ah, si dibu-eegis, tababar, iyo wadaxaajood midho-dhal leh loo sameeyo.

## 7.3. Yoolka Fog: Dhisidda Horumar Joogteysan iyo Diblomaasiyad Haayadeed

Saameynta Soomaaliya ku leedahay Qaramada Midoobay waxa ay ku tiirsan tahay joogitaan haayadeed oo waara, ee kuma xidhna dadaallo shaqsiyeed. Sidaa darteed, Dowladda Federaalku waa in ay qaabeyso waddooyin xirfadeed iyo kuwo farsamo oo diblomaasiyadeed iyo xarumo heer sarsare oo u carbisan dejinta siyaasado istaraatiiji ah.

**Tallaabooyinka lagu taliyay:**

- Xoojinta Machadka Tababarka Diblomaasiyadda ee Muqdisho si uu u noqdo xarun heer heer sare ah, iyada oo la qorayo khubaro ruugcaddaa ah, lana dejiyo barnaamijyo waxbarasho oo shahaadooyinkooda la aqoonsan yahay, kuwaas oo ku saabsan wadaxaajoodka caalamiga ah iyo falanqaynta siyaasadda.
- Abuuridda barnaamij fellowship ah oo ku aaddan dhinacyada diblomaasiyadda, kuwaas oo isku xidhaya tababarka Muqdisho iyo baahida hawlgalka New York.
- Sameynta xafiis joogto ah oo oo isku jaangooya siyaasadda Golaha iyo fikirka siyaasadda Muqdisho, si loo darso isbeddellada caalamiga ah, loona diyaariyo qorsheyaal horusocod ah.

Iyada oo ay hadhsan tahay wax ka yar hal sano, guushu waxa ay ku xidhan tahay tallaabooyin degdeg ah oo si nidaamsan loo fuliyo. Mudnaanta waa in la siiyaa arrimahan soo socda:

1. Mudnaanta koowaad: dhisidda Koox Khubaro ah oo Madaxbannaan, si loo soo saaro siyaasado istaraatiiji ah.

2. Tallaabooyin iskulammaan: ku darista la-taliyayaal takhasus leh iyo xoojinta difaaca diblomaasiyadda.

3. Joogteyn: adeegsiga nidaamyo sharci dhammaystiran, si loo xaqiijiyo in sannadka ugu dambeeya uu noqdo mid lagu garto awood wax-qabad istaraatiiji ah, halkii uu ka ahaan lahaa joogitaan keliya.

**Tixraacyo (Bibliography)**

**Primary Sources: United Nations Documents**

International Court of Justice. "Maritime Delimitation in the Indian Ocean (Somalia v. Kenya)." Judgment, October 12, 2021. https://www.icj-cij.org/case/161.

United Nations. Charter of the United Nations. October 24, 1945.

———. Provisional Rules of Procedure of the Security Council. S/96/Rev.7, 1982.

United Nations Security Council. Report of the Secretary-General on Somalia. S/2024/698, September 7, 2024.

———. Resolution 2758 (XXVI). S/RES/2758. October 25, 1971.

———. Resolution 309. S/RES/309. February 4, 1972.

———. Verbatim Record of the 1616th Meeting. S/PV.1616. December 28, 1971.

**Government and Intergovernmental Documents**

African Union. Ezulwini Consensus on the Reform of the United Nations Security Council. Sirte, Libya: African Union, 2005.

Federal Government of Somalia. Official Statement on the Ethiopia–Somaliland Memorandum of Understanding. January 1, 2024. https://web.facebook.com/MOFASomalia/posts/the-federal-government-of-somalia-unequivocally-rejects-ethiopias-unauthorized-m/751738940312221/?_rdc=1&_rdr.

International Court of Justice. Case Concerning Maritime Delimitation in the Indian Ocean (Somalia v. Kenya): Summary of the Judgment of 12 October 2021. The Hague: ICJ, 2021.

**Reports and Publications from Research Institutions and NGOs**

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs (OCHA). Somalia: Humanitarian Needs Overview 2024. New York: United Nations OCHA, 2024. https://www.unocha.org/publications/report/somalia/somalia-2024-humanitarian-needs-and-response-plan-hnrp.

———. The UN Security Council Working Methods Handbook. New York: Security Council Report, 2023.

———. "Somalia: April 2025 Monthly Forecast." April 1, 2025. https://www.securitycouncilreport.org/monthly-forecast/2025-04/somalia-40.php.

United Nations Development Programme (UNDP). Somalia Annual Report 2024. New York: UNDP, 2024. (Source: UNDP Somalia website).

United Nations Monitoring Group on Somalia and Eritrea. Final Report of the Monitoring Group on Somalia and Eritrea. S/2013/413.

World Bank. Somalia Country Overview: Fragility, Conflict, and Violence. Washington, DC: World Bank, October 2023. https://www.worldbank.org/en/country/somalia/overview.

**News Media and Commentary**

BBC News. "ICJ rejects Kenya case in Somalia maritime border row." October 13, 2021. https://www.bbc.com/news/world-africa-58885535.

Elmi, Afyare, and Yusuf Hassan. "The Coming War Nobody Is Talking About." The New York Times, August 26, 2024. https://www.nytimes.com/2024/08/26/opinion/ethiopia-somalia-conflict.html.

**Other Sources**

Transcripts of anonymized interviews with two former Somali Ministers of Foreign Affairs and one official from the Somali Ministry of Foreign Affairs. Conducted by the author between November 2024 and July 2025. On file with the author.

**Ilo Kale**

Ilo kale waxaa ka mid ah qoraallo wareysiyo oo daahsoon oo lala yeeshay laba Wasiir oo hore uga tirsanaa Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya iyo hal sarkaal oo ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Soomaaliya oo uu sameeyay qoraagu intii u dhaxaysay Nofeembar 2024 iyo Luulyo 2025. Ilo-wareedyadan waxaa lagu hayaa faylka qoraaga.




HERITAGE
INSTITUTE